This page was exported from - Laashin Iyo Hal abuur
Export date: Thu Nov 23 22:12:25 2017 / +0000 GMT

GABAYGA: SOOYAAL Q5AAD Curiye abwaan Maxamad Xuseen Faarax

GABAYGA: SOOYAAL QAYBTII 5AAD SAFGALAAL Gabaygan SOOYAAL, waxaan tiriyey; **28-8-2014.** Waa gabay aan tiriyo kii ugu dheeraa waana (500) oo bayd, waxaana sababay, inuu dheerado gabayg, wuxuu ka hadlayaa sooyaalkii Soomaaliyeed. Gabaygu wuxuu ka kooban yahay shan qaybood oo isku xiran, sidaas daraaddeed, waxaan u u sameeyey tusmadan ah; **Q1AAD; SOOYAAL**; waxay ka hadleysaa soolaalidii hore iyo Soomaalida hadda farqiga u dhexeeya dhaqan ahaan. Ka la soco, baydadka (51) illaa (147), waxaana ka horreeya horudhaca ito ararta gabayga.**Q2AAD; SIRIQROOR**: waxay ka hadleysaa siyaasadda Soomaaliya in aysan xoroobin 1960 illaa hadda. Kala soco baydadka (148) illaa (283)**Q3AAD; SEEGSEEG**: waxay ka hadleysaa guubaabin shacabka Soomaaliyeed. Ka la soco baydadka (284) illaa (338)**Q4AAD; SANADGUURO**; waxay ka hadleysaa, 1-waxay ka hadleysaa xornimada la sheego in 1960kii la qaatay 2- shanta Soomaaliya ee la sheego in ay beentahay 3- 26da june iyo 1da luulyo ee loo dabbaaldego waxa ay tahay. Ka la soco baydadka (339) illaa (427)**Q5AAD; SAFGALAAL**; waxay ka hadleysaa dhibaatada qabyaaladdu ay leedahay. Ka la soco baydadka (428) illaa (503) marka k bogasho wacan.**QAYBTII 5AAD SAFGALAAL** Afartaana intaan sadarra dhigay, siin ma ka hikaadshay 429. Sa'dii aan ka qaadiyo miyaan, surinki waydaarshay 430. Ma u simay sidii seeyma roob, oo salaad da'aya 431. Ma saldheeyey baydgaabku waa, sarin habaabaaye 432. Afar kalena aan kuu sawiro, waa silsilad dheere Waxa qaraniki soomaaliyeed, xididdaduu siibay 434. Ama calanki siigada dhexdhigay, loona ka la soocmay 435. Ama laysku saanjarahayoo, loo susumay dhiigga 436. Sidey aniga i la tahay haddaan, aragti saadaalsho 437. Waa qabyaalad sidashada, waxaan sababinaayaaye. Mar haddey sidaa tahay waxaan, hadal ku saameelay 439. Qabyaaladdaan sirgixan ee dulligu, saabka noo geliyey 440. Qabyaaladdaan siqiir iyo kabiir, wada samaynaayo 441. Qabyaaladdaan sadriga dhaadhacdiyo, seedihiyo uurka 442. Qabyaaladdaan sunnada laga dhigtiyo, waajib na la saaray 443. Qabyaaladdaan sidii miro sabuul, saraca loo beertay 444. Dadka sida sanuuntii u duban, ee ilmaha siistay 445. Oo wanaag ka saacina hayow, waydin saxayaaye 446. Salkac iyo sadaadiyo(65) dil iyo, sigasho mooyaane 447. Saxo caafimaad laga ma helo, sibir qabyaaleede 448. Waa sun qooshan, waabay salliman(66), suuxisiyo geeri 449. Waa sarqaan caqliga suuliyiyo, waalli sirireeda 450. Waa fayris sibiq faafayiyo, aydhis saxariira 451. Waa saliilyo lagu saxanayiyo, cudurka seexaawe 452. Waa naar saciiriyo sahwiyo, suudi miliceede 453. Waa sixir ibliis suusacshiyo, saxaro xaaraane 454. Waa belo cadaawuhu subkiyo, hoog sunaamiya e 455. Waa sirriyo kufrigu saabiyiyo, samayo gaalaade 456. Waa saliingo suusaana(67) iyo, Sooro mudayaane 457. Waa sakiinta lagu qayb saraa, ehel sokeeyaaye 458. Waa madane lagu ka la suntaa, toliyo saaxiibe 459. Waa santuuqda lagu kaydiyaa, sibirka quureede 460. Waa waxa dagaallada socdiyo, sababay sayruuqe 461. Waa waxa qaxootiga susumay, saaray doomaha'e 462. Waa waxa siyaasiga qarriban, qoorta noo suraye 463. Waa waxa sidaan iyo sideer, noo sakaar waraye 464. Qofkaan saa u garanayn ayaan, sii samrinayaaye 465. Imisay silciday oo silciday, oo ku saranseermay 466. Imisay suldaan dubatey iyo, niman salaadiin ah 467. Imisay waxgarad saan jartiyo, sebiyo waayeello 468. Imisay barbaar seef baddiyo, wiilal surar waynle 469. Imisay saraakiil sariyo, jananno haad siisay 470. Imisaa Suleeqiyo ku go'ay, Suubban iyo hooyo 471. Imisay saf dubatoo saf kale, dhaawac sino beelay 472. Imisay nin soof badan lahaa, subax ku cayrtaysay 473. Imisay salkicisoo ka maqan, golaha soomaali? 474. Nin sidsidayba soo aragnay jeer, aaqir say tiriye 475. Mar haddaan sawaab laga helayn, sagagar(68) mooyaane 476. Maxaa belada loo daba socdaa, maa layskaba sayro?. Safgalaal(69) haddii dulunku simay, wadarta soomaali 478. Qabyaaladda sunteedii hadduu, gebigeed saameeyey 479. Sabaan iyo sabaan badan haddii, ay ku saxariirtay 480. Xeerada salkeedii haddii, silac la soo taabtay 481. Waxay weli siddada ugu dhegtaa, waa i soli waysey! Shiinahoo saliiqiyo(70) ka badan, saaqa iyo ciidda 483. Calan qura ayey wada sugtaan, kuna samaadeene 484. Si la mida Imaaraad Carbeed, waa suura waaxida`e 485. Waataas suuqyadoodii haddeer, loo safrahayaaye 486. Yurub baa santuuq yeelatiyo, saayiraad urure 487. Waa kuwaa midow saaxiboo, Yuuro suubsadaye 488. Naataa sarfayn iyo awood, wadar sinnaan guurta 489. Waa kuwaa dayaxa sare degoo, saartay saxankiiye 490. Satarlaytka waa kuwaa rakibay, loolka samadaaye 491. Waa kuwaa sawaariiq tuntoo, loo sabcinayaaye 492. Sanco iyo awood ku ma badniyo, seedda muruqaaye 493. Waxay sidaas ku gaaren tashiga, la is la saabshaaye 494. Inagoo siddeed kunana waan, ka la siqaynaaye 495. Maxaa diiddan soomaalinnimo, inaan sinnaan guuro?. Waxba gabagu yuu ila socone, waxaan ku sooo kobay 497. Iiga sarakac mooyiyo inaad, samir ku dhaaftaaye 498. Iiga siko soomaalaay ma lahan, harag sagaaraade 499. Inaad toban ku wada seexisana, suura gelimayso 500. Waxaan uga socdaa taa kursiga, layska sugan waayey 501.

Samac iyo haddaad leedihiin, arag wax suureeya 502. Suddan idinku dhaarshiyo Sabiyo, SAADIRKA ILAAHE 503. Sidaan dhaama soomaaliyeey, waad surgucateene. **Dhammaad.Curiye abwaan Maxamad Xuseen Faarax ERAYBIXIN**sadaado: dhibatada oon iyo baahi ee qofka korkiisa laga daremo. 66. salliman: gacan ku hubin afsoomaali laakin waa afcarabi. 67. suusaana: wareye BBC. 68. sagagar: iska dabawareeg. 69. safgalaal: saf ciyaar laga badshey dambas wada marin. 70. saliiq: showlaha raaca cuntada ciidda lagu dubto.